

Su'aalaha inta badan ay isweydiyaan KIRAYSTAYAASHA COVID-19

- 1. Ma jiraan wax ilaalin ah oo loogu talo gelay kiraystayaasha inta lagu jiro xaaladda COVID- 19?**
 - Dhammaan ilaalinahu waxay kasoo horjeedaan takoorka codsashada guryeynta inta lagu jiro xaaladda caafimaad ee degdegga ah. Haddii aad aaminsantahay inaad la kulantay takoorka guryeynta, naga soo wac halkan (651) 266-8966 ama iimayl noogu soo dir halkan hrightscomplaints@ci.stpaul.mn.us si aad u xarayso cabasho.
 - Minnesota waxay saartay xannibaad guri ka-saaridda iyo amarada lacag-celinta illaa May 4, 2020; tani wuxu micnaheedu yahay in hantiilayaashu aanay bilaabi karin sii wadida guri ka-saaridda inta lagu jiro muddada xaaladdan degdegga ah marka laga reebo ka-saaridda hoos timaad Minn. Stat. 504B.171 Subd. 1 (fal-dambiyeed dhismaha ka socda) iyo kuwa ah kiraystaha sida dhabta ah halis u gelinaya amniga deggannayaasha
 - Haddii laguugu hanjabay guri ka-saarid muddada xaaladan degdegga ah, waxad usoo gudbin kartaa [cabasho Minnesota Attorney General](#). Markaad soo gudbiso foomka, waxaad codsan kartaa in xafiiskoogu la xidhiidho hantiilahaaga.

- 2. Anigu waxan ahay shaqo laawe ama waxan khasaaray dakhli sababtoo ah COVID-19. Ma jiraan wax taageero dhaqaale ah oo ka caawinaya kiraystayaasha inay bixiyaan kirrada?**
 - Golaha kongareeska wuxu meel-mariyay sharci siinaya muwaadiniinta iyo degganayaasha waxoogaa caawinaad dhaqaale ah.
 - Minnesota waxay kordhisay dheefaha shaqo la'aanta inta lagu jiro xilligan xaaladda degdegga ah.
 - Liis-ka illaha kale ee aad heli karto, fadlan booqo [Websaydka magaalada](#).

- 3. Ma iga saari karaa hantiilaha gurigaygu haddii aanan bixin karin kirada?**
 - Maya. Haddii aad weyday shaqadaadi sababtoo ah COVID-19, u sheeg hantiilahaaga, weydiiso haddii ay kuu ogolaan doonaan inaad dib u bixiso kirada markaad hesho shaqo cusub ama aad hesho dheefaha shaqo la'aanta. Waa inaad qoraal ku qortaa heshiis kasta oo uu kula sameeyo mulkiiluhu. Waxaad u adeegsan kartaa mulkiilahaaga waraaq ama iimayl si aad u diiwaangeliso heshiiskaaga.
 - Haddii aad ku nooshahay guri dad-weyne ama guryeyn la caawiyay, ama lacagta aad ku bixiso warqada-lacag bixinta Qaybta 8, u sheeg isbeddelka dakhliga isla markiiba maamulaha waqadaada lacag-bixinta.
 - Haddaad awoodo inaad sii waddo bixinta kirada waa inaad iska bixisaa, bixinta kirada lama cafin.

- 4. Waxaan haystaa kiis ka saaritaan oo horay ii sugayay, maxaa dhacaya hadda?**
 - Sida uu dhigayo Amarka Fulinta Guddoomiyuhu guri ka-saaritaanada 20-14 lama sameyn karo haddii aanu kiiskaagu hoos iman Minn. Stat. 540B.171 Subd. 1 (fal-dambiyeed dhismaha ka socda) iyo kuwa ah kiraystaha sida dhabta ah halis u gelinaya amniga deggannayaasha
 - Waa inaad maxkamadda ka heshid ogeysiis, waxa kale oo aad ka wici kartaa khadka macluumaadka maxkamadda halkan (651) 266-8266 macluumaad badan oo ku saabsan kiiskaaga.

- 5. Maxaa dhacaya haddii heshiiskayga kiradu dhacayo dhammaadka bisha?**
 - Haddii aanad awoodin inaad guurto inta lagu jiro muddadan xaaladda degdegga ah ku ogeysii hantiilahaaga qoraal. Marka la eego Amarka Fulinta Guddoomiyaha #20-14, waad ku sii jiri kartaa gurigaaga inta lagu jiro xaaladdan degdegga ah.

- 6. Hantiilaha gurigaygu ma cusboonaysiin doono heshiiskayga ama wuxu doonayaa inuu iga saaro guriga sababtoo ah waxan ka imid waddan kale oo uu si aad ah u saameeyay COVID-19?**
 - Hantiile kaama saari karo guri ama kulama dhaqmi karo si gaar ah sababtoo ah waxad ka timid waddan kale oo uu si aad ah u saameeyay COVID-19.
 - Sharciyada guryeynta caddaalada waxay ka ilaaliyaan dadka takoorka ku saleysan asalka dalka.
 - Haddii ay tani kugu dhacdo, naga soo wac halkan (651) 266-8966 ama iimayl noogu soo dir halkan hrightscomplaints@ci.stpaul.mn.us

- 7. Hantiilaha gurigaygu ma iga saari karaa guriga sababtoo ah haddan qabo COVID-19?**
 - Maya. Haddii hantiilahaagu kuu soo diro ogeysiis ah guri-saarid adna aad aaminsan tahay inay sababtu tahay COVID-19, tani waxay noqon kartaa takoor.
 - Haddii ay tani kugu dhacdo, naga soo wac halkan (651) 266-8966 ama iimayl noogu soo dir halkan hrightscomplaints@ci.stpaul.mn.us

- 8. Hantiilaha gurigaygu ma damin karaa adeeyadayda?**
 - Maya, adeegyadaada lama damin karo haddii aanay ahayn daruuri in la dayactiro ama la saxo qalabka ama la ilaaliyo caafimaadka iyo bad-baadada kiraystayaasha.
 - Haddii adeeggaaga la jaray, fadlan la xidhiidh shirkadda adeeggaaga si ay adeeggaaga dib iskugu xidho.
 - Haddii aad la kulanto dhibaato ku saabsan ilaalinta/dayactirka waad ka wici kartaa Waaxda Bad-baadada iyo Kormeerka halkan (651) 266-8989,

- 9. Waxa i dhibaateynaya dariskayga ama shaqaalaha sababtoo ah waxay u maleynayaan in aan qabo COVID-19. Maxaan sameyn karaa?**
- Qoraal ahaan ugu sheeg hantiilaha gurigaaga in lagu dhibaateeyay. Weydiiso hantiilaha in uu u sheego kiraystayaasha ama shaqaalaha inay joojiyaan dhibaateyntaada.
 - Hantiiluhu waa in uu qaadaa talaabooyin wax lagaga qabanayo arrimahaas.
 - Haddii hantiilaha gurigaagu aanu sameyn wax ficil ah oo dhibaateyntuna sii socoto, naga soo wac halkan (651) 266-8966 ama noogu soo dir iimayl halkan hightscomplaints@ci.stpaul.mn.us
- 10. Hantiilaha gurigaygu wuxu soo diray iimayl kaas oo looga baahan yahay qof kasta inuu xafiiska u-soo sheego haddii kiraystayaashu muujiyaan calaamadaha COVID-19. Hantiilaha gurigaygu ma sameyn karaa sidaas?**
- Kirayste ahaan uma baahnid inaad kala hadasho xaaladahaaga caafimaad hantiilaha gurigaaga.
- 11. Carruurtaaydu waxay joogaan guriga maalinta oo dhan sababtoo ah COVID-19 dariskayguna waxay u cawdeen hantiilaha guriga in carruurtaaydu ay sameynayaan buuq badan. Miyuu hantiilaha gurigaygu iga saari karaa guriga sababtoo ah dariskayga ayaa cawday?**
- Sharciyada guryeynta caddaaladu waxay mam-nuuceen takoorka qoysaska carruurta leh.
 - Haddii buuqu aanu macquul ahayn ama uu dhacayo xilliyada dambe habeenkii, marka waxay noqon kartaa ku xadguddub heshiis kiro haddii heshiiskaaga kiradu mam-nuucayo codadka sare kaddib xilliyo gaar ah habeenkii..
- 12. Waxaan wajahayaa rabshada lammaanaha guriga ama waxa la ila karantimeeyay lammaane dhib badan. Sideen u heli karaa caawimaad?**
- Haddii aad wajahayso rabshad guri, ama haddii aad tahay dhibane faraxumeyn galmo, fadlan wac 9-1-1.
 - Waad awoodi kartaa inaad jabiso heshiiskaaga kirada oo aad guurto.
 - Haddii aad ku jirto caawinaada guryeynta ee dawladda dhexe ama aad hayso waraaqda lacag-bixinta (Qaybta 8), waxa kale oo aad heli kartaa xuquuqda aad ku jabiso heshiiska kiradaada oo aad u heli kartid ilaalinaha kale ee hoos yimaad Dhaq-dhaqaaqa Xadguddubka Ka-dhanka ah Dumarka, oo ay la socoto beddel degdeg ah qaar ka mid ah kiisaska.

Haddii aad aaminsan tahay inaad la kulantay takoor guryeynta, naga soo wac halkan (651) 266-8966 ama iimayl noogu soo dir halkan hrightscomplaints@ci.stpaul.mn.us si aad u xarayso cabasho.